

SOMALI

**LOOGU TALOGALAY SIIDEYN DEGDEG AH**

16ka Jannaayo, 2019

Xiriirka: Dawn Schellenberg  
206-684-5189  
[dawn.schellenberg@seattle.gov](mailto:dawn.schellenberg@seattle.gov)

## In bulshada la kaashado si loo qeexo sinnaanta gaadiidka

*Hadda waxaa furan codsiyada loogu talogalay Kooxda-Shaqa ee Sinnaanta Gaadiidka ee cusub ee SDOT*

SEATTLE – Qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadeenna ee Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) waa in aan xaqijino in dadku ay helaan ikhtiyaaro gaadiid ammaan ah, la awoodi karo oo deegaan ahaan la joogtayn karo. Seattle dhexdeeda, gaadiidka ayaa ah kan labaad ee ugu sarreeya qarashka qoyska ka-dib guryaynta. Bulshooyinka halista ugu jira barokaca ayaa dusha u dhigta culayska sinnaan la'aanta gaadiidka. Iyadoo lala jaan qaadayo yoolalka Dadaalka Cadaaladda Bulshada iyo Isirk ee Magaalada Seattle, SDOT ayaa sameysay [Barnaamijka Sinnaanka Gaadiidka](#) sanadkii 2017 waxaa uuna diiradda saarayaa in uu u horseedo qaab-dhismeedka sinnaanka isirk.

Si ay wax-uga-qabato sinnaan la'aantan, SDOT ayaa waxaa ay sameynaysaa [Kooxdeeda-shaqa ee Sannaanta Gaadiidka ee ugu horeysay](#) waxaanna hadda furan codsiyada.

Waxaanu dooneynaa in aan isku keenno koox shakhsiyad ah oo ka tirsan ururrada bulshada ku dhisan, isbaheysiyada, ama shabakadaha ka dhix jira bulshooyinka kala duwan ee Seattle si ay ugu taageeraan SDOT in ay sameyso qeexid la wadaago oo ah waxa uu gaadiidku yahay, gaar ahaan bulshooyinka ay sida aadka ah saameynata ugu yeeshen kala duwanaanshaha gaadiidka. Kooxda-shaqa ayaa iskaashan doonta iyagoo si la fududeeyay uga qaybqaadan doona hal-sano sameynata Ajeenda Sinnaanta Gaadiidka.

SDOT ayaa waxaa ay martigelin doontaa kulan macluumaad maalinta Khamiista, 31ka Jannaayo, 1-3 (PM) galabnimo oo lagu qaban doono Maktabadda Rainier Beach (9125 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118) halkaas oo codsadayaasha daneynaya ay wax badan ka oggaan karaan oo ayna su'aalo ku wayddiin karaan shaqaalaha SDOT.

Haddii aad daneynayo in aad codsato ama aad raadinayo macluumaad dheeraad ah, wax badan ka ogow [www.seattle.gov/transportation/equityworkgroup](#). Wuxaad hadda ka codsan kartaa online-ka laga bilaabo 22ka Febraayo, 5:30 (PM) galabnimo.

*Hiigsiga Waaxda Gaadiidka ee Seattle waa in ay bixiso nidaam gaadiid tayo-sare leh oo loogu talogalay Seattle.*